KU DHAQAN XAFIIS D.

Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I Muqdisho, 29 Settembre 1973 **L. 18**

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 23 Giugno 1973, L. 90 — *Guno ah Sh. 200 la siyo Wakiilada Xafiiska Siyaasada Qaranka ee Degmoyinka oo dhan.* Bog. 305

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 1 Agosto 1973, L. 91 — *Tuulada Go'o ee ka Go'i Dekmada Oodweyne Raacaysaana Degmada Sheekh.* » 306

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 1 Agosto 1973, L. 92 — *Tuulada Ceelhuur ee go'i Degmada Hobyo Raaceysana Degmada Xarardheere.* » 307

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 1 Seetembre 1973, L. 93 — *Beddelaad iyo Kordhin Sharci ku Saabsan Daawada Xoolaha L. 28 Tr. 15-2-1973.* Bog. 308

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 14 Agosto 1973, L. 94 — *Magacaabid Guddoomiye Degmo.* » 309

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA, 30 Agosto 1973, L. 95 — *Gaashanle Sare Cumar Moxamed Guled oo la Magacaabay.* » 310

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA, 30 Agosto 1973, L. 96 — *Magacaabid (Assessori) Corte Assise ee Gobolka Hiiran Sannadkan.* » 311

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Agosto 1973, L. 97 — *Dhul la siiyey Xusen Moxamud Moxamed ku fadhiya 228; Dhul la siiyey Ismacil Maxamud Moxamed ku fadhiya 288 mdh.* » 312

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Agosto 1973, L. 98 — *Siismo dhul Dawladeed la siyey Cali Cusman Maxamed.* » 313

BOOGA SEDEEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maryan Maxamed Xusen. L. 150.* Bog. 314

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Sheekh Cali Moxamed Cosman. L. 151.* » 315

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaji Adan Axmed Afqalooc. L. 152.* » 315

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Jamac Xaji Ciilmi. L. 153.* » 315

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Nur Gelleb Abukar. L. 154.* » 316

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Axmed Fagi Bana. L. 155.* » 316

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xawa Maxamud Axmed. L. 156.* » 317

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Xasan Ismacil. L. 157.* » 317

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaji Farax Siyad. L. 158.* » 317

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Dhumid Bug. L. 350-4 — *Cabdi Cali Jaamac. L. 159.* » 318

MAXKAMADDA GOBOLKA BURCO, Ogeysiis Dhumid Bug. L. 1110-7 — *Jamac Diriye Maxamed. L. 160.* » 318

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
23 Giugno 1973, L. 90.
Guno ah Sh. 200 oo la siiyo Wakiilada Xafiiska Siyaasada Qaranka ee Degmooyinka oo dhan.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xashidii Kowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka ee 21kii Oktobar;

ISAGOO ARKAY Sharcigii lambarkiisu ahaa 40 ee 26kii Marso 1972, kuna saabsanaa Dhismaha Xafiiska Xiriirka Dadweynaha;

ISAGOO ARKAY Wareegatadii lambarkedu ahaa SPP-SRC-1-2975 ee 31kii Luliyo 1972, ee lagu amray in Degma kasta laga furo Xafiis Hanuuninta Dadweynaha, si ay hanuunintu ugu fiddo Dalka oo dhan;

ISAGOO TIXGELINAYA Ra'yigii Koghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha iyo Xoghayaha Xafiiska Xiriirka Dadweynaha;

ISAGOO OGAADAY Hawsha iyo Xilka dheeradka ah ee gaar ahaan loo saaray madaxda Xafiisyada Xiriirinta Dadweynaha ee Degmooyinka.

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1

Dadka wakiilada ka ah Xafiisyada Xiriirka Dadweynaha ee ka furen Degmooyinka in la siiyo 200 shilin bil kasta.

Lacagtaas oo lagu macaabo Gunno waxay u bilaabatay dadkaas 1d bisha jannayo 1973.

Khaıashkana waxaa laga bixin doonaa Kabitalka 3aad ee miisaniyadda Dawledaha Hooce ee Degmooyinka.

Qodobka 2

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya.

Muqdisho, 23 Giugno 1973.

MADAXWEYNAHA GOLOHA
SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
S. Guuto Xusen Kulmie Afrax
Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Lacagta
Takh. Maxamad Yusuf Weyrax

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 237.
Mogadiscio, li 14 Luglio 1973.
Il Magistrato ai Conti:
ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

1 Agosto 1973, L. 91.

Tuulada Go'o ee ka go'i Degmada Oodeweyne raacaysana Degmada Sheekh.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Octoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 3d (lambarka 5d) ee sharciga la soo saaray 8dii bisha juunyo 1972 lambarkiisuna yahay 52;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arrimadha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in tuulada Go'o laga gooyo Degmada Oodweyne lana soo raaciyo Degmada Sheekh.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1d

1. Tuulada Go'o waxaa laga gooyay Degmada Oodweyne oo ay hore uga irsaneed waxaana la raaciyey Degmada Sheekh.

2. Guddigii Kacaanka ee hore uga dhisnaa isla tuuladaa waxba iskama bedelin wuxuuna hoos imanayaa Guddiga Kacaanka ee Degmada Sheekh.

Qodobka 2d

Xeer Dowladeedkani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1 Agosto 1973.

WAXAA SAXIIXAY GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamad Siyad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arr. Gudaha
S. Gaas Xusen Kulmiye

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 100.
Mogadiscio, li 22 Agosto 1973.
Il Magistrato ai Conti:

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

1 Agosto 1973, L. 92.

Tuulada Ceelhuur ee ka go'i Degmada Hobyo Raaceysana Degmada Xarardhree.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 3d (lambarka 5d) ee sharciga la soo saaray 8dii bisha juuyo 1972 lambarkiisuna yahay 52;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in tuulada Ceel-huur laga gooyo Degmada Hobyo oo ay hore uga tirsaneed lana soo raaciyo Degmada Xarardheere.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1d

1. Tuulada Ceel-huur waxaa laga gooyay Degmada Hobyo oo ay hore uga tirsaneed waxaana la soo raaciyay Degmada Xarardheere.

2. Guddigii Kacaanka ee hore dhisnaa isla Tuuladaa waxba iskama bedelin wuxuuna hoos imaanayaa Guddiga Kacaanka ee Degmada Xarardheere.

Qodobka 2d

Xeer Dowladeedkani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1 Agosto 1973.

WAXAA SAXIIXAY GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamad Siyad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arr. Gudaha
S. Gaas Xusen Kulmiye

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 99.
Mogadiscio, li 22 Agostc 1973.
Il Magistrato ai Conti:

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
1 Settembre1973, L. 93.
Beddelaad iyo kordhin sharci ku Saabsan Daawada xoolaha lam. 28 — Taar. 15-2-1973.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaashidii 1d iyo 2d ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

ISAGA OO AQOONSADAY Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1

Qodobka 1d sharciga lam. 28 taarikhdiisuna tahay 15 febrayo 1973 waxaa lagu kordhiyey xubin kale oo loo akhrin doono sida soo socota:

« 2. Daawada Xoolaha ee lacag la'aanta ah xeer tilmaameed ayuu Xoghayaha Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaq ku soo saari doonaa.

Qodobka 2

Qodobka saddexaad ee qaanuunka kor ku qoran waxaa lagu kordhiyey xubin cusub oo loo akhrin doono sida soo socota:

« 3. Daawada qodobkan ku tilmaaman waxaa loo la jeedaa kuwa lacag la'aanta dawladdu xoolo-dhaqatada ku siiso.

Qodobka 3

Qodob cusub ayaa lagu daray sharciga kor ku qoran oo loo akrin doono sido soo socota:

Dawladaha Hoose waxaa loo oggolyahay iney farmasi daawo-xoolaad sameystaan sameystaan, ruqsadda lagu furayo waxa bixin kara Xoghayaha Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

Dawladaha Hoose waxey ka iibsanayaan Daawada Xoolaha, Laanta Daawada Xoolaha ee Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa. Waxayna xoolo-dhaqatada kaga iibin karaan marba qiimaha wasaaraddu ay u gooyso daawooyinkaas.

Qodobka 4

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta, la saxiixo, waxaana lagu qori doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Settembre 1973.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA
SARE EE KACAANKA

Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

14 Agosto 1973, L. 94.

Magacaabid guddoomiye degmo.

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY Kaashidiii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka kowaad Xarafka L iyo kan labaiyotobnaad ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 soona baxay siddeedii Juunyo 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baaida loo qabo in loo magacaabo Guddomiyo Guddiga Degmada Kisimaayo.

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

In Jaalle Yusuf Ibrahim Cali «Aburaas» uu Guddoomiye ka noqdo Guddiga Degmada Kisimaayo.

Qodobka 2aad

Go'aankanu wuxuu u dhaqan golayaa si degdeg ah waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Agosto 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrah

VISTO e registrato - Reg. n. 3, foglio n. 85.
Mogadiscio, li 22 Agosto 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA

30 Agosto 1973, L. 95.

Gaashaanle Sare Cumar Maxamed Guleed oo la Magaabay.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGA OO ARAGNAY Xaashidii Kowaad ee Kacaanka Tawriga ah, ee la wareegay awooddii guud ahaaba - awooddii Xeerarka, aweeddii Dawladda iyo aweeddii Carsoorka ee dhan;

ANNAGA OO ARAGNAY Qodobka L. 56 ee Lacagta Dawladda u degaan lana ogolaaday 17dii Diseembar 1962 lambarkiisuna yahay 317;

TIXGELINTA Baahida loo qabo in degdeg Gaashaanle Sare Cumar Maxamed Guleed uu sii maamulo saxiixana lacagaha ka baxa Miisaaniyada Xabsiyada ee 1973 ee dhan inta uu maqan yahay Taliyaha Ciidamada Xabsiyada Ismaciil Axmed Ismaciil.

DEKREETO

Qodobka 1aad

Ka bilaabata 20kii bisha Agosto, 1973 Gaashaanle Sare Cumar Maxamed Guleed waxaa loo wakiishay inuu maamulo saxiixana lacagta ku jirta Miisaaniyada 1973 ee Xabsiyada (Funds - Prisons) ilaa inta uu Taliyaha Ciidamada Xabsiyada oo haatan maqani soo noqonaale.

Muqdisho, 30 Agosto 1973.

Jaalle Cabdulsalaam Sheekh Xusen
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

VISTO e registrato - Reg. n.-, foglio n. 106.
Mogadiscio, li 2 Settembre 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA
30 Agosto 1973, L. 96.
Magacaabid (Assessori) Corte Assise ee Gobolka Hiiran, sanadkan 1973.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKUU ARKAY Warqaddii kowaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Xeerkii soo baxay 21kii Oktobar 1969;

MARKUU ARKAY Xeerkii soo baxay 3dii Juunyo 1962, L. 14 ee Nidaamka Dawladda iyo wixii iska beddelay;

MARKU ARKAY Qodobka 26, faqrada Koowad ee Xeerkii Tashriiciga ahaa 12kii Juunyo 1962, L. 3 ee Nidaamka qadaha ah.

DEKREETO:

Qodobka 1

Jaallayaasha aynu hoos ku soo sheegi doonno, waxaa loo magacaabay inay ka noqdaan (Assessori) Maxkamadda *Corte Assise* ee Gobolka Hiiraan, sannadkaan 1973:

1. Maxamed Cabdille Shidle
2. Maxamed Cabdalla Maxamed
3. Cabdirraxman Maxamed Weheliye
4. Xaxan Xaaji Cigaal
5. Xaaji Isaaq Cisman
6. Axmed Maanac Axmed
7. Maxamed Cabdoow Maxamed
8. Cabdi Aden Bile
9. Maxamed Maxamud Cabdul
10. Faaduma Cilmi Yusuf
11. Cismaan Aden Faarah.

Qodobka 2

Dekreetadani waxay leedahay dhaqan degdeg ah.

Muqdisho, 30 Agosto 1973.

Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xusen
XOGHAYAHA DAWLADDA

VISTO e registrato - Rtg. n. 3, foglio n. 117.
Mogadiscio, li 2 Settembre 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

15 Agosto 1973, L. 97.

Dhul la siiyey Xusen Maxamud Maxamed ku fadhiya 288 mdh.
Dhul la siiyey Ismacil Maxamud Maxamed ku fadhiya 288 mdh.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 115 taarikhdeeduna aheyd 13 Settembre 1956;

ANNAGOO ARAGNAY Faafin rasmi ah T. tahay 18 Juunyo 1973, L. 11, oo caddeynayaa in Cabdullahi Maxamud Maxamed la siiyey dhul dawladeed ee ku fadhiya 576 mdh. kuna yaala Muqdisho - Xafadda Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1570 taarikhdeeduna aheyd 8-9-1969, oo lagu qoray buuga Canshurta L. 729 nuqul ee ah Xafiska Canshurta L. 19, oo lagu dhigay Xafiska Notayaha Cabdulla Xaji Farah oo ku saabsan hibees dhul, uu hibseyay Cabdullahi Maxamed Maxamud oo ka qateen Jaalleyasha Ismail Maxamud Maxamed iyo Xusen Maxadmud Maxamed — dhulka la mid ah mid ah mqh. 576, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 3889 Rep. taarikhdeeduna aheyd 1° Aprile 1973, oo lagu qoray buuga Canshurta L. 146 nuqul ee ah Xafiska Canshurta L. 20, oo lagu dhigay Xafiska Notayaha Sr. Musse Xusen Sadiq, oo ku saabsan heshiiskan hoos ku qoran, Jaallayaasha waxa ay caddeyeyeen in ay isla leeyihiin labadda guri oo daarta ah:

A) — In Jaalle Xusen Maxamud Maxamed la siiyey uuna qaatay guriga lambarkiisu yahay ZA-4-41, oo ku dhisan dhulka ah mt. 24x12 mqh. 288, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wabtri;

B) — In Jaalle Ismacil Maxamud Maxamed la siiyey uu asna qatay guriga daarta ah oo lambarkiisu yahay ZA-4-47, oo ku dhisan dhulka ah mt. 24x12 mqh. 288, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda hobsinada dhulka ay qortay Xafiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, aheyd 19-4-1973 wahay caddeyneysa in dhismaha iyo naqshadda L. 39 yahay oo ay isle yihiin;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay xafiska ku shaqa leh L. 810 oo Taarikh 27-3-1973 cadeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

AMAR XEER

A) — Waxaan la caddeynayaa in Jaalle Xusen Maxamud Maxamed la siiyey uuna qaatay guriga Lambarkiisu yahay ZA-4-41, oo ku dhisan dhulka ah mt. 24x12 wuxuuna lamid yahay 288 mdh.
Sohdimaha: Bari waxaa ka xiga waddo, Waqooyi waxaa ka xiga waddo, Galbeed waxaa ka xiga Jaalle Ismacil Maxamud Maxamed, Koofur waxaa ka xiga waddo.

B) — Waxaan la caddeynayq in Jaalle Ismacil Maxamud Maxamed la siiyey uu asan qaatay guriga daarta ah oo lambarkiisu yahay ZA-4-47, oo ku dhisan dhulka ah mt. 24x12 wuxuuna lamid yahay 288 mdh.

Sohdimaha: Bari waxaa ka xiga Jaalle Xusen Maxamud Maxamed, Waqooyi, Galbeed, Koofur waxaa ka xiga waddoyin, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Waberi.

Muqdisho, 15 Agosto 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

21 Agosto 1973, L. 98.

Siismo dhul Dawladeed la siyey Cali Cusman Maxamed.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadaa Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna aheyd 9 Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Cali Cusman Maxamed taarikhdeeduna aheyd 15-12-1957, kuna yaal Muqdisho — Via R. Santini;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey Xafiska ku shaga lahaa, laguna dhabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda L. 5 taarikhdeduna tahay 2-5-1958;
ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii lanta dhismaha iyo Dhulka uu ku saabsaned naqshadda dhismaha bishii 18-12-1960 waa soo gudubtay;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu aheyd L. 72982 taarikhdeeduna aheyd 13-12-1972, in Cali Cusman Maxamed uu dhibay Xafiska Canshurta Dawladda lacagta dhulka tiradeedu tahay Sh. So. 597,80;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambartedu yahay MW-3-23-1564 taarikhdeeduna yahay 16-12-1972, in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiyay 298,90;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Cali Cusman Maxamed la siiyey dhul Dawladeed ee ku fadhiya 298,90 mdh. kuna yaala Muqdisho — Jidka R. Santini.

Muqdisho, 21 Agosto 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H.G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 41.
Mogadiscio, li 29 Agosto 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

BOOGA SEDEEXAAD
TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Marian Moxamed Xussen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 5-8-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21ka Oktobar, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 32; Galbeed dhul L. 25; Bari dhul L. 27.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 29 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dishmaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A Đ A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shekh Cali Moxamed Cosman, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 5-3-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardiglye, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 27,2x12,6 = 342,72 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Wadiiqo (passaggio); Bari Dhulkii hore.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 29 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dishmaha iyo Dhulka

(151) *Cabdikarim Cige Guled*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Aadan Axmed Afqalooc, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 28-8-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas rektangular (9x8), kuna fadhiya 72 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jidka Maka Mukarama; Koofur Jid yar oo 1,50; Galbeed Jidka Ugaandha; Bari guriga xooga gorantada.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 3 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(152) *Cabdikarim Cige Guled*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jamac Xaji Cilmi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 22 Luglio 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktobar, oo leh qiyaas rektangular (40x20) kuna fadhiya 800 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbted dhul L. 24 iyo 30; Bari dhul L. 26 iyo 32.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 9 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(153) *Moxamed Cbdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nuura Gelle Abukar, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 12 Agosto 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Dhul L. 45; Galbeed Dhul L. 38; Bari Dhul L. 40.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 9 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(154) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Fagi Baana, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 30-8-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Km. IV, oo leh qiyaas rektangular, kuna fadhiya 56x13,60 = 761,60 mdh.

Soohdin: Waqooyi Adan Cabdulle Cusman; Koofur Jid; Galbeed Dr. Yusuf Xirsi; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 9 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(155) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaawa Maxamuud Axmed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 12 Luuliyo 1966, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 30x30 = 900 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Cabdullaahi Shekh Mocow; Galbeed Xaaji Cabdulqaadir; Bari Cokeera.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 9 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(156) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamuud Xasan Ismaacil, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 30 Agosto 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21ka Oktobar, oo leh qiyaas rektangular (30x20), kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul L. 303; Koofur Jid; Galbeed dhul 308; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Settembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(157) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Faarax Siyad, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 26 Agosto 1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda M. A. Xalane, oo leh qiyaas mt. 50x25, kuna fadhiya 1,250 = mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul dawladeed; Koofur Jidka Xalane; Galbeed dhul L. 572,66; Bari dhulkaan barkiisa waxaa degan Jeom. Branko.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon)

maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisro, 11 Settebre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(158) *Maxamed Cabdi Saciid*

MAXKAMADDA GOBALKA XAMAR

Waxaan arkhriay dacwaddaan uu soo qortay Jaalle Cabdi Cali Jaamac, waxayna shaqo xafiiskaan hadadba markaan arkay qodobka 69 D. L. del 9-9-65 n. 2;

Waxaan cad dhumidda buugga Lam. 350-4 ay ku tiil lacag tiradeedu tahay 1.300 Shilin (kun iyo seddex boqol) oo shilin, Bangiga Ganacsiga Somaliyeed, laanta Muqdisho, waxaan amrayaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad buugaas Cabdi Cali Jaamac mudo soddon beri ah (30 beri) oo ka bilaabato markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale haddaan la helin qof kale oo Sheegta buugaas;

Waxaan ka loo la cadeynayaa in buugaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qofka sita wakaalad cad, isagoo la sugaayo 30 kaas beri.

Xamar, 9-9-1973.

Guddomyaha Max. Gobalka X.

(159) *Dr. Xusen Shiikh Cabduraxmaan*

MAXKAMADDA GOBOLKA BURCO

Jamac Diriye Maxamed — Sheegte.
Bankiga Kaydsiga iyo amaahda Somaliyeed — Lo Sheegte.
Lanta Burco.

WAKAALADDA CAYMISKA UMMADDA — LANTA BURCO
XUKUM — (Decree)

Weedistay wuxu soo qoray weedin uu donayo in Buuga Kaysiga ee lambarkiisu yahay 1110-7 lacagtiisuna 702 shilin tarikhdiisuna ahayd 31-3-1973 oo uu laha weedistay Jamac Diriye, Maxamed in uu ka lummay.

Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Somaliyeed (laanta Burco) wa hubiyeen iyago so qoray warqadda lumberka 000101 oo tarikhdiisuna tahay 31-3-1973 in Buuga Keydsiga oo ku qoornaa magaca ku yaal xaaga sare uu ka lumay.

Maxkamadu waxay xukumtay oo ay aqonsatey in Buuga kaydsiga ee lacagtiisuna ahayd 702 (todo boqol) shilin in la tirro iyado la tiixraco Qodobka 27 Legislative Decree Law No. 2kii 9th September 1965, oo lacagta lo ceeliyo ninka 30 (sodon) casho dabadeed xukunka lugu qoro Official Bulletin.

Weediistuna wa in uu bixiiya wiixi kharash ah. Amarkega iyo saxeega iyo Shabaddi Maxkamadda Gobolka maanta oo tarikhdu tahay 16-4-1973.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Burco

(160) *Sharif Xaji Dhere*